Psykiatri

REGION

KUSOO DHAWOOW Xarumaha Caafimaadka Maskaxda ee Bulshada. Daawaynta Cudurada Maskaxda taasoo ku haboon nolol maalmeedkaaga maalinba maalinta xigta

VELKOMMEN i distriktspsykiatrien

Sprogversion: Somalisk

Magac:

Takhtarka mas’uulka ka ah daawaynta:

Daaweeyaha mas’uulka ka ah hab socodka daawaynta :

Xariirka Aasaasiga ah:

Taleefoon:

KUSOO DHAWOOW

Xarumaha Caafimaadka Maskaxda ee Bulshada, waxaan bixinaa daawayn kusaabsan jirada maskaxda bukaan socodka ah. Intey daawaynta socoto, ula jeedadu waxay tahay in laguugu caawiyo inaad si buuxda u soo bogsato ama inaad si weyn u dareentid. Reysasho dhaqsida heerka kasoo reysashada cudurka maskaxda way kala duwan tahay qofba qofka kale. Si kastaba ha ahaatee, daawaynta saxda ah qofkasta wuxuu sameyn karaa horumar iyo ambaqaadid/dibna usii wataan nolol maalmeedkooda caadiga ah.

Badanaaba, daawaynta waxay ka dhacdaa Xarumaha Caafimaadka Maskaxda ee Bulshada. Xaaladaha gaarka ah, waxaan kuu habeyn karnaa inaan guriga kugu soo booqano meeshii aad xarunta ka imaan lahayd.

XARIIRKAAGA TAKHTAR IYO XARIIRADA AASAASKA

Waxaa laguu xilsaari doonaa xariir takhtar iyo hal ama ka badan aasas xariiro. Waxey maamuli doonaan oo ay si gooni ah u ilaalin doonaan daawayntaada, si ay u hubsadaan in lagu siiyey warbaxin iyo tallo ku saabsan xanuunkaaga iyo daawaynta aad heshay.

Waxay ku siin doonaan hogaan iyo taageero ah sidaad ula tacaali laheyd jirrada,nolol maalmaadkaada iyo wax kasta oo tixgelin waxbarasho ah oo aad qabto, tababar ama shaqo. Waxay awoodaan sidoo kale inay la shaqeeyaan macaamiishada, tusaale ahaan, dowlada hoose iyo awoodaha kale ee guud.

Waxaad ka heli doontaa magaca takhtarkaaga kula xariiraya iyo aasaaska xariirkaba warqadaan bilowgeeda.

BAARISTA IYO DAAWAYNTA

Kooxda daawaynta waxay ka kooban yahiin kooxo xirfadlayaal ah oo kala duwan, kuwaasoo u wada shaqeeya si ay u hormariyaan xeelad wanaagsan oo daawayn ah. Shaqaalaha waxaa waajib ku ah mowduuca qarsoodiga ah keliyana waxaa loo ogol yahay in lagala hadlo warbaxinta kugu saabsan kuwa ay quseyso daawayntaada.

Dhamaan daawaynta socota ee Xarumaha Caafimaadka Maskaxda ee Bulshada waxay ku bilaabeysaa wadahadal/baaris. Halkan, waxaan kula diyaarineynaa wax kasta oo tallo ah/baaritaanada laga yaabo in loo baahdo iyo qorshaha daawayntaada.

Daawaynta waxay ka kooban tahay:

- daawayn
- la talin
- waxbarasho ku saabsan xanuunkaaga gaar (garasho cilmi nasfsi)
- taageero bulsho dhisid ama dib udhisid awoodaada si aad u caafimaado una hormarto qaab kuu ogolaanaya in aad gaartid ujeedooyinkaada iyo rajooyinka aad nolosha ka leedahay
- tallo qoys iyo hogaamin
- la tallin caafimaad

Waxaan kaloo kugula talinaynaa waxyaabaha laga helo agagaarka deegankaada ee kugu caawinaya helida nolol maalmeed nidmaasan.

QORSHAHA DAAWAYNTA

Takhtarka iyo kooxda daawaynta kaleba waxay kugula shaqeyn doonaan dejinta qorshaha ku saabsan daawayntaada. Qorshaha daawaynta waxaa loogu tala galay in la hubsado inuu jiro heshiis ah hadafyada daawayntaada, iyo waxa dhici doona inta lagu guda jiro daawayntaada.

Waxaa lagu siin doonaa nuqul qorshaha daawayntaan kusaabsan.

QOYSKA IYO DARYEELAYAASHA

Xarumaha Caafimaadka Maskaxda ee Bulshada, waxay nala tahay in ay muhiim tahay kusoo darida lagu soo daro daawayntaada qoyska iyo daryeelayaashaada. Rajadeenu waa wadashaqeyn ku saleysan is xishmeyn iyo is aaminaad lagu saleeyey rabitaankaaga.

Qoyska iyo daryeelayaasha waxaa laga yaabaa, tusaale ahaan, inay ahaadan qoyskaada, ama saaxiib kuudhow, ama qof kale oo awooda caawintaada inta aad daawaynta lagu guda jiro. Ogaanshaha qoyska iyo daryeelayaasha waxaad haysataa iyo xanuunkaaga wuu awooda inay ka caawiso horumar ah daawayntaada.

Waan kaala hadli doonaa wax ku saabsan qofka aad rajeyneysid daawayntaada.

DIIWAAN GALINTA BUKAANKAAGA

Jiradaada, iyo daawaynta iyo waxyeelooyinka, waxay yihiin kuwa lagu sifeeyey aasaas joogta ah ee diiwaangalka bukaanka.hadii aad ka weyn tahay da'da 15 waxaad awoodaa inaad isticmaashid qaab diiwaan galin elektaroonig oo ah diiwaan galkaaga (*e-jornaal*) waxaad ka heli kartaa www.sundhed.dk. Tani waxay u baahan tahay saxiix lambaro leh ama NemID. Waxaad kaheli kartaa si aad u aqrisato diiwaan galinta elektarooniga ee bukaankaga 14 maalmood kadib markii la galiyey diiwaankaaga. Waxaad kaloo haysataa iqtiyaar in aad heli kartid nuqul diwaangalkaga la heshiiska dakhtarka.

Isku duwida daawayntaada habka ugu wanaagsan, waxaan u baahanahy inaan awood u leenahay kala qaadasho warbaxin ku saabsan caafimaadkaga GP gaga iyo, halka ku haboon, dowladda hoose. Tani waxey u baahantahay ogolaanshahaaga, anagana waan kaala tashan doonaa.

ILAA IYO INTEE AYEY SOCONEYSAA DAAWAYNTA?

Soo noqnoqoshada daawaynta iyo dhererka waqtiga loo baahan yahay daawaynta ee Xarumaha Caafimaadka Maskaxda ee Bulshada way ka duwan tahay qofba qofka kale. Tani waan kaala wada hadli doonaa markey daawaynta bilabaneyso sidoo kale waxaaan si isdaba jog ah dib kaagala hubin doonaa xaaladada sidaa darted daawaynta mar walba waxay waafaqsanaaneysaa xaaladdada, rabitaanada iyo waxa loo baahan yahay.

MARKA DAAWAYNTA AY DHAMAATO

Ka hor inta aysan daawayntaada naga dhamanin, waxaan yeelaneyna wadahadalka ugu danbeeya. Takhtarka, xariirkaaga iyo qof kastoo ay quseyso

waa ay ka qeyb qaadan doonaan wadahadalka. Tixraaca is xig-xiga ee daawayntaada waxaa lagu ogolaan doonaa kulankaas.

WAAN DANEYNEYNAA INAAN MAQALNO WAXAAD KU FAKAREYSID

Waxaan jeclaan laheyn in aynu ogaano sida aad dareentey waxa ku saabsan daawayntaada Xarumaha Caafimaadka Maskaxda ee Bulshada. Fadlan lasoo xariir shaqaalaha hadii aad qabto fikrado wax horumarin kara, sidaas waxaan ku wanaajin karnaa waxa aynu bixino.

MA JECLAAN LAHEYD INAAD OGAATID WAX DHEERI AH?

Macluumaad baddan oo kusaabsan Adeegyada Caafimaadka ee Maskaxda – Caasimada Gobolka ee Denmark waxaad ka heli kartaa bogga internetka:
www.psykiatri-regionh.dk

Salaanta ugu wanaagsan,
Gobolka Hovedstadens Psykiatri (Adeegyada Caafimaadka ee Maskaxda – Caasimada Gobolka ee Denmark)

ADEEGYADA CAAFIMAADKA EE MASKAXDA – CAASIMADA GOBOLKA EE DENMARK

Adeegyada Caafimaadka ee Maskaxda – Caasimada Gobolka ee Denmark waa isbitaalka ugu weyn Denmark ee daryeelka caafimaadka maskaxda wuxuuna daaweeyaa ku dhowaad 41,000 bukaan sanad kasta jirooyinka sida isku dhaxyaac maskaxeedka, walwalka, niyadjabka. Daawaynta waxay ka dhaci doontaa Xarumaha Caafimaadka ee Maskaxda iyo Xarumaha Caafimaadka Maskaxda ee Cunuga iyo Qaan gaarbiloowga daawaynta cudurada maskaxda ee Adeegyada Caafimaadka Maskaxda – Caasimada Gobolka ee Denmark kuwaasoo ku yaala juquraafi ahaan kuna faafsan dhamaan Caasimada Gobolka, daawaynta hoos timaada Adeegyada Caafimaadka ee Maskaxda – Caasimada Gobolka ee Denmark waa aasaaska asluub bukaan socod eegtada lagu daaweeyo iyo xarumaha Adeegyada Caafimaadka Maskaxda ee Bulshada, booqashada kooxaha iyo, meeshii daruuri ah, u ogolaanashaha galida bukaanka.

Gobolka Hovedstadens Psykiatri (Adeegyada Caafimaad ee Maskaxda – Caasimada Gobolka ee Denmark)
Kristineberg 3
DK-2100 Copenhagen Ø, Denmark
Tal: +45 4511 2000
www.psykiatri-gobolh.dk

Habaynta sawirka: Rikke Bransner
Koncern Kommunikation, Grafik & TV
Sawir qaade: Phillip Drago Jørgensen
Janaayo 2012

Sawirka warqadani wuxuu ku tusaya bukaanka iyo shaqaalaha xaaladooda maalin walba ee Gobolka Hovedstadens Psykiatri (Adeyada Caafimaadka ee Maskaxda – Caasimada Gobolka ee Denmark).